

I-READY READING (UDIYAAR GAROOWGA AKHRISKA)

Qiimeynta waxay siisaa warbixin qiimo leh ardayda, waaladiinta iyo macalimiinta oo kusaabsan in ardaydu ay gaareen heerka fasalka laga rabo iyo heerarka udagsan maadada ayna kusocdaan wadadii qalin jabinta oo udiyaarsan qarniga 21 aad. Natiijooyinka qiimaynta waxaa loogu talagalay inay hal cadayn unoqdaan hormarka aqooneed ee cunugaaga.



MAXAY TAHAY QIIMAYNTAAN?

i-Ready Reading waa imtaxaan taxliilin ah oo kumbuyuutarka lagu sameeyo kaasoo qiimayn balaaran kabaxsha xirfadaha akhriska ee ardayda lana socda kobaca ardayga iyo dadaalkiisa intii muddo ah. Ayadoo qaab horusocod leh loogu salaynaayo jawaabaha uu ardaygu baxsho, i-Ready Reading wuxuu macluumaad balaaran ka aruushaa tiro kooban maadooyinka imtaxaanka ah; tani waxay usahlaysaa in imtaxaanku si sax ah umuujiyo awoodaha iyo baahiyaha ardayga ee dhamaan qaybaha muhiimka u ah akhriska ardayda fasalada K-8.

Gudiga Gobalka ayaa ansixiyay in i-Ready Reading uu noqdo imtaxaan lagu qiimeeyo heerarka guusha akhriska ee ardayda, lagu baaro arday ciladu kahaysato akhriska, lagu aqoonsado maadooyinka diirada/fursadaha lasiinaayo si dadaal dheeri ah loogasho, iyo badalida qaabka casharada. Si waafaqsan Sharciga READ ee Colorado, macluumaadka taxliilinta ah ee i-Ready Reading waxaa loo adeegsan karaa in lagu aburo qorshayasha taageerada akhriska ee gaarka ah (Qorshayaasha READ) oo loo samaynaayo ardayda leh akhriska kahooseeya heerka fasalka loona cabiro fahanka ardayda ee Heerarka Caadiga ah ee Udagsan Aqoonta Gobalka.



XAGEE AYAA CUNUGAYGA IMTAXAANKA LOOGA QAADAYAA?

Sida kucad sharciga Colorado READ, dhamaan ardayda dhigata fasalada K-3 waa in lagu imtaxaanaa qiimaynta akhriska ee Gudigga Gobalku aqoonsanyihiin inta lagu jiro xiisadaha gaarka ah ee imtaxaanka. Imtaxaanada xiisadaha Sharciga READ waxaa lasameeyaa lix asbuuc xiliga dayrta, bartamaha sanadka, iyo xiliga gu'ga. Ardayda dugsiga barbaarinta waxay leeyihiin 30 maalmood oo dheeri ah si ay ugu dhameeyaan qiimaynta. Sida uuqabo sharciga gobalku, ardayda dugsiga barbaarinta ilaa fasalka sadexaad kuwaasoo keena heerka kahooseeya karitada aqooneed ee laga rabo waxay ubaahan yihiin inay maraan hal ilaa labo qiimayno dheeri ah si looxaqiijiyo heerkooda akhrinta.

Qaybaha Imtaxaanka Sharciga READ:

Fasalka k – 12	Dabayaaqada Agoso – Dabayaaqada Oktoobar	Dayrta
Fasalka k – 12	Diseembar – Bartamaha Feebaraayo	Bartamaha Sanadka
Fasalka k – 12	Maajo	Gu'ga

Maalmaha imtaxaanka laqaadaayo ayaa kaladuwanaa kara ayagoo kuxiran dugsiga. Si aad uhesho macluumaadka maalmaha gaarka ah ee ardaygaagu imtaxaanka galaayo, fadlan waydii macalinka cunugaaga.



WAA MAXAY BUUNDOOYINKA CUNUGAYGU HELI DOONO?

i-Ready Reading wuxuukeenaa labo natiijo oo muhiim ah:

- Cabirka Buundada Guud ee i-Ready waxay qiyastaa awooda guud ee akhriska ardayga ayadoo lagu salaynaayo imtaxanka taxliilinta ah ee dhamaan qaybaha akhriska (xirfadaha aasaasiga ah, eray bixinta, iyo fahanka). Buundooyinka cabirku waxay udhaxeeyaan 100 – 800 halkii qiimaynba taasoo usahlaysa macalimiinta inay isku fiirshaan aqoonta ardayda ayna kucabiraan kobaca fasalada kaladuwan iyo maadooyinka kaladuwan ay kasamaynayaan.
- Heerka Meelaynta Guud - wuxuu adeegsadaa shaxda meelaynta heerka fasalka si loo go'aansho awooda guud ee heerka fasalka ardayga ayadoo laraacaayo natiijooyinka kasoo baxa qiimayn gaar ah oo taxliilin ah. Afarta heer ee maalaynta macquulka ah ayaa kala ah:

Mid kasaraysa Heerka | Mid ku'eg Heerka | Mid kusii dhaw heerka | Heer Ubaahan Kobcin



SIDEE AYAA BUUNDOOYINKAAN LOO ADEEGSANAYAA?

Imtaxaanka i-Ready Reading wuxuu siiyaa macluumaadka dhibcaha muhiimka ah oo ay macalimiintu u adeegsadaan hagista iyo wax kabadalka casharka, buundooyinka i-Ready waxaa loo adeegsan karaa in lagu aqoonsado yoolal kuhaboon awoodaha iyo meelaha uu kuliito ardaygu, in lagu kormeero kobaca ardayga, in lagu aqoonsado talaabooyinka gaarka ah ee xiga ee casharada, in lagu abuuro taageerooyin akhriska ah oo gaar ah, iyo in lagu go'aansho in cunugaagu ubaahan yahay taageero dheri ah oo laga siiyo akhriska iyo inkale.



WARBIXIN DHEERAAD AH

Waxaan kugu dhiirgalinaynaa inaad kaqaybgasho waxbarashada cunugaaga. Fadlan haka daahin inaad laxariirto macalinka ardaygaaga si uu kuugu sheego qaababka aad kucaawin karto cunugaaga markuu guriga joogo iyo helitaanka caawimaado dhanka imtaxaanka ah.

Wixii macluumaad dheeri ah: Qiimeynada

Booqo:

- assessments.dpsk12.org

Hadaad su'aalo iyo walaacyo kaqabto imtaxaanada, fadlan laxariir dugsiga cunugaaga si toos ah ama wac Adeegyada Deegnaaka Qoyska oo nambarkoodu yahay (720) 423-3054.